


VISION ZEROØ

AMMAANKA JIDADKA SEATTLE



MAXAY TAHAY "VISION ZERO"?

Vision Zero waa dhaqdhaqaaq ka socda dunida oo idil si loo soo afjaro dhimashada baabuurta iyo dhaawacyada culus ee ka jira jidadkena ugu dambayn sannadka 2030. Waa dhaqdhaqaaq ku saabsan sida dhamaan loo siiyo jidad ammaan ah.

SOMALI



SIDEE AYAY U SHAQEYN DOONTAA?

Magaalada Seattle, Vision Zero waxay isticmaali doontaa hab dhamaystiran oo ku shaqeeya xogta handasada jidad ku dhisan xikmad, lala mataameeya aqoon ku toosan meesha looga baahan yahay iyo hirgelin - hab muujiyay shaqada uu ka qabtay magaalooyinka ballan qaaday ujeedooyinka la midka ah.

MAXAY TANI U TAHAY MUHIIM?

Seattle waxaa si joogto ah loo aqoonsaday in ay tahay mid ka mid ah magaalooyinka ugu ammaansan waddanka, hase ahaatee waxaan la kulanay in ka badan 35,000 shilal saddaxdii sanno ee la soo dhaafay. Sannad kasta, ku dhawaad 20 qof ayaa ku dhimata jidadkena. Tani waa wax aan la ogolaan karin. Dhimasho kasta ama dhaawac kasta waxay khasaaro u soo gaarsiisaa qoyska, asxaabta, iyo bulshada balaaran. Has

Magaalada Seattle, waxaan rabnaa in ay magaalooyinkena ay ammaan u ahadaan qof kasta - laga bilaabo caruurtena 8 jirka ilaa awooweyaashena iyo awooweyaashena 80 jirka.

Dhamaanteen waa in aan dareenaa ammaan iyo raaxo, haddii aan socono, haddii aan wadno baabuur, haddii aan raacno baskiil, qaadano bas, ama haddii aan dhaqaajino xamuul.e ahatee, waajib ma aha in ay sidaas ahaato.

MAXAA MACNO AH AYAY TANI U LEEDAHAY JIDADKA SEATTLE?

Vision Zero waxaad bilaabi doontaa in aad ku aragtid:

- Handasooyinka jidadka dhiirigeliya ammaanka dabecadda iyo ammaanka ka hor mariya xawaaraha iyo
- Yareynta xawaaraha loo dajiyay jidadka xaafadaha la daggan yahay iyo jidadka halbowlaha ee lagu badan yahay
- Hirgelinta sharciyada jidadka ay shilalka ku badan yahiin
- Ka qeyb qaadashada aqoonta iyo dadweynaha

YAA KU LUF LEH?

Dhamaanteen.

Safarada aan maalin kasta galno, mid kasta oo naga mid ah wuxuu gaaraa go'aano oo saameyn kara naf ilaa abid. Haddii aan runta sheegno, waxay u badan tahay in aan dhamaanteen, taxadir la'aan, soconay jidadka, gudubnay calaamadda joogso, ama aan ka istaagin qof gudbaaya jidka. Iyo waxay kaloo u badan tahay in dad badan oo naga mid ah ku dhawadeen xaalado ay ku sigteen in ay galaan shil.

Waxay qaadan doontaa dhamaanteen oo wada shaqeeyna, gaarno go'aano ku dhisan garasho maalin kasta, si aan shilalka u gaarsiino ilaa eber.

Go'aanadaas iyo dhaqankaas waa isku darsoomi doonaan, taasoo naga dhigi doonta magaalo wanaagsan, xooggan, oo ammaan ah.